
# Retinopathiga Indhaha dhicisnimada (ROP)

# Retinopathy of Prematurity (ROP) (Somali)

Retinopathiga Indhaha dhicisnimada (ROP) waa dhibaato indhaha ku haysa dhallaankadhasha goor hore ( dhicis). Waxaad ugu dhawaaqdaa sida: re-tin-**op**-uh-thee of pree-mah-**ture**-i-tee.

## Waa maxay ROP

Retina waa lakab ku yaal gudaha qaybta danbe ee isha. Haddii ishu ahaan lahayd kamarad, retina waxay ahaan lahayd filimka sawirka qaadaya.




**Sawirka 1** Il ay hayso ROP

- Retina waxa ay ka heshaa ogsijiin iyo nafaqo xididada dhiiga ee isha (Sawirka 1). Marka dhallaanku goor hore dhashaan, xididdada indhahooda weli way korayaan.
- Dhakhtarka ku takhasusay daryeelka indhaha ee carruurta (dhakhtarka indhaha ee carruurta) ayaa baari doona oo hubin doona dhammaan dhallaanka ka yar 3 rodol iyo 5 wiqiyadood markay dhashaan iyo/ama dhasha 31 toddobaad ka hor ROP.

 ©1981, dib loo eegay 2023, Nationwide Children's Hospital Sii socda…

- Qiyaastii 4 ilaa 8 toddobaad ka dib dhalmada dhicisnimada, xididdada waxaa laga yaabaa inaysan si caadi ah u korin. Marka tani dhacdo, xididdada cusub awood kufilan malahan. Waxaa laga yaabaa inay siidaayaan dareere, dhiig, ama waxay keeni karaan nabar. Tani waa ROP.
- Hadba siduu ilmuhu uyar yahay, ayay u badan tahay inay qaadaan ROP. Carruurta ka yar 2 rodol iyo 3 wiqiyadood markay dhashaan, in ka badan 8 ka mid ah 10kiiba waxaa ku dhaca ROP.
- Ilmahaagu waxa uu leeyahay fursad sare oo uu ku qaadi karo ROP haddii ay leeyihiin:
  - Dhibaatooyinka neefsashada
  - Kordhid miisaan oo xun
  - Haday mataan yihiin
  - Caabuq
  - Dhoor dhiig ku shubid

## Sidee ROP u Saameyneysaa Ilmahayga

ROP waxay u dhaxayn kartaa mid fudud ilaa mid daran.

- Yar ilaa dhexdhexaad – dhallaanku si caadi ah ayey wax u arkaan da' ahaantooda mana laha calaamado. ROP waxaa laga yaabaa inuu baaba'o marka xididada dhiiggu ay koraan. Ilmahan waa in aanay yeelan indho beel ama nabro.
- ROP daran ayaa khatar ku ah aragga ilmahaaga. Waxay keeni kartaa indho la'aan buuxda. ROP ee daran waxay u baahan tahay daaweyn.
- Sababtoo ah dhallaanka dhicisoobay inta badan waxay ka baxaan cisbitaalka ka hor taariikhda kama dambaysta ah, baaritaannada indhaha ee soconaya ayaa laga yaabaa in loo baahdo si loo daawado ROP.

## Baaritaan

- Goojada qalaqaada ayaa lagu dhibcin doonaa indhaha ilmahaaga si ay bu'du u weynaato. Tani waxay u ogolaanaysaa dhakhtarka inuu arko xididdada dhiigga ee gudaha isha. Indhahoodu way fidsansanaan doona 3 ilaa 8 saacadood ka dib dhibcaha.
- Dhakhtarka indhaha ayaa isticmaali doona 3 qalab marka uu samaynayo baaritaanka isha ilmahaaga. Waxa loo isticmaalaa dibadda indhaha oo ma xanuujin doonto ilmahaaga. Ilmahaagu wuxuu dareemi doonaa cadaadis laakiin xanuun ma jiro.
  - Speculumka:  Indhahooda ayay kala haysa.
  - Dhibreesada:  waxay toosisaa isha si uu dhakhtarku si fiican ugu arko.
  - Iftiin:  waxay ka caawisaa dhakhtarka inuu ku eego leensiska. Tani waxay yara dhibi kartaa ilmahaaga oo ay ka oohin kartaa. Tani si dhakhso ah ayaa loo sameeyaa mana xanuujiso. Waad dabooli kartaa indhahooda baaritaanka ka dib haddii aad rabto.


Sii socda…

## Daaweynta ROP ee daran

- **Avastin®:** Avastin (bevacizumab) waa daawo la isku duro. Waxa lagu duraa isha. Waxay ka hortagtaa samaynta kiimikada sababta koritaanka caadiga ahayn ee xididdada dhiigga. Tani waxay siin doontaa xididdada caadiga ah waqti ay ku koraan. Daaweyntan waxaa badanaa loo isticmaalaa dhallaanka dhiciska ah ee qaba ROP daran. Ilmahaan ayaa mar kale qaadi kara ROP daran waxayna u baahan yihiin daaweyn kale. Ilmahaaga ayaa loo suuxin doonaa daawaynta Avastin®.

- **Qalliinka leesarka:** Waxaa la dhigaayaa calaamado badan oo leesar ah oo yaryar oo ku yaal xuubka retinaga isha ee aan xididdada dhiiggu aysan ka koreynin. Meesha retina ee aan lahayn xididdada dhiigga waxay sababtaa koritaanka xididdada dhiigga ee xanuunsan Laysarka ayaa joojin karta koritaankan. Il kasta waxay ku qaadataa 30 ilaa 45 daqiiqo in lagu daweeyo. Wax goyn ah (jeexitaan) indhaha laguma sameeyo. Ilmahaagu wuxuu yeelan doonaa gabuubin guud oo loogu talagalay daawaynta laysarka.
  - **Qalitaanka ka dib, waxaa laga yaabaa inaad dareento guduud isha ah iyo barar indhashareeraha ah 1 ilaa 3 maalmood.** Ilmahaagu ayaa dareemi doona xanuun aad u yar.
  - **Isla markiiba** wac haddii ilmahaagu leeyahay mid ka mid ah calaamadaha soo socda:
    - Qandho ka sarreysa 101° Fahrenheit (F) ama 38.3° Celsius (C)
    - Isha aad uguudata
    - Xanuun oo kordha
    - Isha oo dareerta
  - Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad guriga kusiiso goojada indhaha ilmahaaga 1 ilaa 2 toddobaad. Goojooyinkan indhaha ayaa caawiya in isha ay bogsato.

## Lasocodka

Ballamaha lasocodka **aad** bay muhiim u yihiin si loo eego daawaynta ilmahaaga iyo horumarka indhahooda.

- Marka ilmahaagu guriga ka tago, weydii goorta ay tahay balantooda lasocodka. Marka hore, ballamahani waxay noqon karaan maalin kasta ama toddobaad kasta. Intaa ka dib, haddii ilmahaagu wanaagsan yahay, ballamaha way yaraan doonaan.

- Waqtiga booqashooyinka waa muhiim. Ka baaqashada ballamaha waxay dib u dhigi kartaa daaweynta ilmahaaga.

- Hubi in kooxda daryeelka caafimaadka ilmahaaga ay haystaan lambarka telefoonkaaga iyo ciwaankaga hadda. Tani waxay ka caawinaysaa xafiiska dhakhtarka indhaha inuu kaala soo xiriiro ballamaha iyo cusbooneysiinta.

Haddii aad hayso su'aalo ama aad u baahan tahay inaad ballan u qabsato ilmahaaga, wac Xarunta Indhaha (614) 722-4076.